

## ***KURAASTA BADBAADADA CARRUURTA***

*Sharciga California waxa uu qabaa in carruurta jirta ama ka yar (4) sano kana yar (40) rodol lagu xiro*

*kuraasta gaarka u ah ee loogu talo galay markii gaari lagu qaadayo. Haddii darawalka lagu qabto kursi aan kii carruurta ahayn isagoo ku wada ilmaha waxaa darawalka lagu ganaaxayaa lacag u dhexeysa \$136-\$270.*



*Waxaa jira seddex nooc oo kuraasta carruurta ah, waxayna yihiin:*

- *Kuraasta Ilmaha Dhashay (Infant Safety Seats): Waxaa loogu talo galay ilmaha markaa dhashay ilaa ay ka gaaraan (20) rodol. Waa in ay u jeedaan dhanka dambe ee gaariga.*
- *Kuraasta La Rogrogo (Convertible Seats): Waxaa loogu talo galay ilmaha dhasha ilaa uu ka gaaro (40) rodol. Waa in ilaa ilmuhu ka garayaan sanad gadaal loo jeediyaa.*
- *Boosterka (Safety Boosters): Waxaa loogu talo galay ilmaha ka weynaada markiiba kuraasta caadiga ah.*

*Markaad gadanayso kursiga ilmaha waa in aad hubisaa in uu sharciga waafaqsan yahay. Waa in aad hubisaa in uu le'eg yahay gaarigaaga kuna jaan go'an yahay kuraasta. Kuraasta carruurta waxaa lagu soo gadan karaa wax yar sida \$50.*

*Haddii gaarigaagu ku leeyahay buufimada badbaadinta shilka waa in ilmaha lagu xiraa kursiga dambe. Ogow in bed qabka ilmahaagu ku xiran yahay xilkasnimadaada mar kasta oo aad gaari wadeyso.*

### **Meelaha aad ka heli kartid:**

Ha'adah Layidhaahdo **Safely on the Move** Waxay u fidi saa qoyseska danyarta ah Kuraasta gaariga oo qiimo jaban ah wac telafoonkan: 619-594-0784 or 1-866-700-7686.

Website: <http://www.safelyonthemove.sdsu.edu>